*Sameynta Warqada*

# ***Ogalaanshaha Wakiilka***



**Buugan yari waxa loogu talo galaya dadka Alberta ee ka fikiraya in ay qoraan ama badelaan warqad Ogalaansho Wakiil.** Warqadan ogalaanshaha shakhsigu waxay kuu ogalaaneysaa inaad qorsheyso mustaqbalka adoo u magacaabaya qof kale inuu maareeyo arimahaaga shakhsiyadeed, arimahaaga aan la khuseyn dhaqaale adoo wali nool lakiin aan awood u lahayn inaad sidaas sameyso. Buugan yari wuxuu bixinayaa kaliya macluumaad guud, maaha talo sharci. Hadii aad u baahan tahay caawimo ama talo faahfaahsan, ka eeg/fiiri dhamaadka buugan yar macluumaad dheeri ah.

*Ha iskugu haleyn buugan yar talo sharci ahaan.*
*Wuxuu ku siinayaa macluumaad guud oo ku sahabsan*
***kaliya sharciga Alberta**. 2020*

Centre for Public Legal Education Alberta (cplea)

## Iska fogeyn

**Waxyaabaha buugan yar ka kooban yahay waxaa loo bixiyaa macluumaad guud ahaaneed oo kaliya. Ma aha talo sharci.** Haddii aad qabto dhibaato sharci, waa inaad la tashataa qareen.

Macluumaadka uu ka kooban yahay buugan yari sax ayuu ahaa wakhtigii lasoo saarey. Ogsoonow in laga yaabo inay jiraan isbeddelo ku-xiga oo ka dhigaya macluumaadka mid wakhtigiisii dhaafey (dhacay) waqtiga aad akhrineyso. Xarunta Macluumaadka Sharciga ee Alberta Ltd. ma masuul kama noqon doonto wixii khasaare ah ee ka imanaya ku tiirsanaanta ama ficil lasameeyo (ama aan la sameyn) taas oo ka dhalatay macluumaadkan.

## Mahadnaq

Waxaan jeclaan lahayn inaan uga mahadcelino Hay'adda Sharciga Alberta iyo Waaxda Caddaaladda Canada bixinta maalgalinta hawlaha-shaqo, taas oo suuro galineysa daabacadaha sida tan.

Photo Credit: ID 28936870 © Gajus | Dreamstime.com

**© Xarunta macluumaadka Sharciga ee Alberta Ltd., Edmonton, Alberta**

**Dib-eegistii u danbeysay 2020**

***Ka hawl-galeysa:* Xarunta Waxbarashada Sharciga Dadweynaha ee Alberta**

Xarunta Macluumaadka Sharciga ee Alberta Ltd, oo ka hawl galaysa Xarunta Waxbarashada Sharciga Dadweynaha Alberta, waa urur aan faa'iido doon ahayn oo hadafkiisu yahay inuu dadka ka caawiyo inay fahmaan sharciga maadaamoo uu saameynayo noloshooda maalin walba.

Waxaanu soo saarnaa buug yar oo ku qoran luqad fudud, bandhigyo, iyo qalab waxbarasho oo kale si dadka looga caawiyo inay aqoonsadaan oo ay uga jawaabaan xuquuqdooda iyo waajibaadkooda sharci. Waxaan leenahay barnaamijyo kala duwan, waxaanna bixinnaa macluumaad sharci ah iyo gudbin ku saabsan mawduucyo sharci oo badan. MAcluumaad dheeri ah, Fadlan booqo www.cplea.ca.

Centre for Public Legal Education Alberta

#800, 10050 112 Street
Edmonton, Alberta T5K 2J1

**Phone** 780.451.8764
**Fax** 780.451.2341
**Email** info@cplea.ca
**Web** www.cplea.ca

# Tusmada


| | |
|---|---|
| **Waa maxay Warqada Ogalaanshaha Wakiilka** | **4** |
| **Sameynta Warqada Ogalaanshaha Wakiilka** | **7** |
| Awooda Maskaxda | 7 |
| Magacaabista Wakiil | 8 |
| Makhraatiga Warqada Ogalaanshaha Wakiilka | 9 |
| Masuulka Caruurta Yar-Yar | 10 |
| Awoodaha Wakiilka | 10 |
| Dhaqan-Galinta | 12 |
| Dib helida Awooda Maskaxda | 13 |
| Halka lagu kaydinayo Warqada Ogalaansha Wakiilka | 14 |
| **Dib u Eegista Waraqada Ogalaanshaha Wakiilka** | **15** |
| **Joojinta Warqada Ogalaanshaha Wakiilka** | **16** |
| **Ku Sameyn Maamul Xumo Warqada Ogalaanshaha Wakiilka** | **17** |
| **Diidida Warqada Ogalaanshaha Wakillka** | **18** |
| **Erey-bixinta** | **19** |
| **Macluumaad** | **22** |

# Waa maxay Warqada Ogalaanshaha Wakiilka?

Alberta dhexdeeda, Xeerka Waqrada Ogalaanshaha wakiilka ayaa sameeya Warqada Ogalaanshaha Wakiilka.

Warqada Ogalaanshaha wakiilku waa warqad qoran, saxeexan, taariikhaysan markhaatina leh taas oo siineysa qof kale xaquuqda uu ku sameynayo go'aamo la xiidhidha arimaahaga shakhsiyadeed, iyo arimahaaga aan dhaqaale ahayn adoo wali nool. Tan waxa ku jira kara go'aamada la xidhiidha daryeelka caafimaad, gurayaha, iyo daaweynta caafimaad.

**Mararka qaar warqad waxa loo yaqaan "Dardaaranka Nool" lakiin, Alberta dhexdeeda, ereyga sharciga ah ee saxda ahi waxa weeyi "Warqada Ogalaanshaha Wakiilka."**

Warqada Ogalaansha Wakiilku **ma siineyso** qofka awooda uu ku sameeyo go'aano ku sahabsan dhaqaalahaaga hadii aad weydo awoodaada maskaxeed — Taasi waxaad u baahan tahay warqad gaar ah oo loo yaqaan **Warqada Ogalaanshaha Qareenka**.

Markaad sameyso warqada ogalaansaha wakiilka, waxaad tahay "**Ku-Sameeyaha**" waxaanad magacaabeysaa qof kale (**Wakiilkaaga**)si uu u sameeyo go'aamadaada shakhsiyadeed.

Warqada Ogalaanshaha wakiilka gaar ah waxay shaqeyneysaa markaad haba yaratee aand awoodin maskax ahaan inaad sameyso go'aamada shakhsiaydeed. Kaliya waxay khuseysaa intaad nooshahay waxaaney dhamaaneysaa markaad dhimato.

Awooda maskaxda macnehedu waxa weeyi awoodida inaad fahanto macluumaadk la xidhiidha sameynta go'aamo iyo awooda lagu fahmayo caqabadaha mustaqbalka muuqda ay yeelan karaan go'aamadaasi.

Waa inaad haystaa warqada ogalaanshaha wakiilka maxaa yeelay hadii aad ka cabato dhaawac halis ah ama xanuun, waxa lagayaabaa inaad awoodi weydo sameynta go'aamadaada shakhsiyadeed. Tani waa caafimaad daro maskaxeed ama awood daro maskaxeed. Sharciga Alberta iskama ogalaanayo in qof kale kuu

sameeyo go'aamo shakhsi adiga. Diyaarinta imika warqada ogalaanshaha wakiilka, inta aad maskxiyan u awoodo, waxaad ilaalineysaa hubina kartaa in go'aamadaada shakhsiyadeed uu sameyn doono qof garanaya adiga iyo waxaad rabto.

Bilaa warqad ogalaaansho wakiilka, qoyskaaga ama cidkale oo daneyneysa waa inuu ka codsadaa maxkamada Alberta xeerka Masuuliyada iyo sii-haynta si uu u noqdo wakiilkaaga. Habkanmaxkamadu wuxuu qaadan karaa bilo, waana adayg, kharash badana wuu ku bixi karaa. Waxa sidoo kale ka dhalan karta in qof kuu sameynaya go'aamadaada adoon dooranadigu.

Xaaladaha caafimaad ee degdega ah, shaqaale caafimaad ayaa kusiin kara adeegyada caafimaad adiga hadii aad weydo awoodaada maskaxeed iyo xataa hadii aanad haysan warqada ogalaanshaha wakiilka. Si kastaba ahaatee, xaaladaha aan degdeg ahayn, dhakhaatiirta iyo daryeel caafimaad bixiyayaasha kale ayaa kusiii sameyn kara go'aamada iyadoon fasax laga haysan midkiina adiga (hadii aad maskaxiyan u awoodo) ama wakiilkaaga.

Dawladu (iyadoo mareysa **xafiiska masuuliyada dadweynaha iyo sii-haynta**, ama si fudud loogu yaqaano **Masuuliyada dadweynaha**) ma noqneyso wakiilkaaga ilaa aanu jirin qofkale oo raba, awooda kuna haboon inuu ku matalo.

**Xafiiska Daryeelka dadweynaha iyo Amaanada**

Adeegyada iyo caawimada dadka Alberta ee jilicdasan iyo qoysaskooda.

Bilaash ku wac: 310.0000 markaa 780.422.1868

www.alberta.ca/office-public-guardian-trustee.aspx

Warqada ogalaanshaha wakiilku waxa suurto gal in aaney ka shaqeyn meel ka baxsan Alberta.

**Wakiilnimada qareenka,** Nooc matalaad qareen oo sii socota xataa hadii qof ku lumiyo awooda maskaxdiisa.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku sahabsan Warqada Ogalaanshaha Qareenka, ka eeg buuga yare e CPLEAs ee loo yaqaan **Sameynta Warqada Ogalaanshaha Qareenka**.

**Masuul,** qof **weyn** ah, qof loo magacaabey masuul ahaan amarka masuuliyada ee lagu xusey xeerka 26 ee masuulnimada iyo aaminaada ee Alberta. Masuulka qof weyn wuxuu awood u leeyahay inuu u sameeyo go'aamo shakhsiyadeed, aanse ahayn kuwo dhaqaale qofkaasi weyn.

**Amarka Masuulnimada,** ee qof **weyn**, amar maxkamadi sameysay kuna xusan xeerka 26 ee Masuulinimada qof weyn iyo Aaminaada ee Alberta kana jawaabaya codsiga qofka codsanaya in loo magacaabo masuulka qof weyn.

**Wakiil kale,** Qof lagu magacabey dikreeto/ tilmaam shakhsiyadeed si uu u hawl-galo hadii wakiil kale aanu matali Karin.

**Xaas,** Qofka qof uu si sharci ah u guursadey/ qabo.

**Lamaane isku-tiirsan,** Qof aad la leedahay xidiidh isku-tiirsanaan lamaane.

Warqada Ogalaanshah Wakiilku waxa shaqeyneysaa ilaa:

- Aad dhimato;
- aad ka noqoto (joojiso);
- maxkamadi go'aamiso inaan warqada ogalaansha wakiilku aaney shaqeyneyn; ama
- Wakillkaagu dhinto ama iskaga tago oo aaney jirin wakiil badelkiisa oo la wareega.

Xasuuso in wakiilku kaliya sameyn karo go'aamada hoos imaada Warqadaada Oglanaashaha Wakiilka inta aad la'dahay awoodaada maskaxeed (inta aanad maskax ahaan u awoodin). Waxa suurto gal ah inaad dib u hesho awoodaada maskaxeed oo aad awoodo inaad sameyso qaar ama dhamaan go'aamdaada shakhsiyadeed marlabaad. Hadii gabi ahaanba aad dib u hesho awoodaada maskaxeed, wakiilkaagu haba yaraatee fasax uma haysto uu kugu matalo adiga. Markaasi, uma baahnid inaad sameyso Warqad Ogalaansho Wakiil ilaa wakiilka joogaa aanu buuxin baahiyahaaga. Hadii aad weydo awoodaada maskaxeed marlabaad, isla Warqadaada Ogalaanshaha Wakiilka ayaa la isticmaali karaa.

Waxaad lahaan kartaa ha lama in kabada oo Warqad Ogalaansho Wakiil oo sax ah. Tusaale ahaa, waxa aad lahaan kartaa warqado kala duwan oo aad ugu talo gashay ujeedooyin kala duwan. Lakiin waxay nqon kartaa jahawareer hadii in kadan hal Warqad Ogalaansho Wakiil siineyso awood kala duwan dadkala duwan. Sidoo kale, hadii Warqadahaaga Ogalaanshaha Wakiiladu si burineyaan arimaha qaar, waxa sax noqneysa uun Warqada Ogalaanshaha Wakiilk ee ugu cusub, ta hore ma noqoneyso ansax.

Foomka Maamulka Alberta ee Warqada Oglaanshaha Wakiilka waxa laga heli karaa halkan:

https://www.alberta.ca/personal-directive.aspx#toc-1

# Sameynta Warqada Ogalaanshaha Wakiilka

Alberta dhexdeeda, Warqada Ogalaanshaha Wakiilku waa in ay noqotaa qoraal, oo ay saxeexeen, taariikhna u yeeleen adiga (sameeyaha) iyo markhatiga, idinkoo wada xaadira. Waa inaad ahaataa 18 jir da'da am aka weyn tahay, waa inaad sidoo kale, wakhtiga saxeexa, fahantaa qaabka iyo saameynta warqada.

Hadii aanad jidh ahaan u awoodin inaad saxeexdo, Warqadaada Ogalaansha Wakiilka waxa kuu sexeexi kara qof kale, lakiin qofkaasi ma noqon karo wakiilka loo magacaabey ama xaaska/sayga ama lamaane wakiilkaaga.

Waxaad sameyn kartaa Warqadaada Ogalaanshaha Wakiil ama waxa kaa caawin kara looyar. Dawlada Alberta waxay leedahay foom aad buuxin karto ama u isticmaali karto si aad u sameyso Waqrada Ogalaanshaaga Wakiilka.

## Awooda Maskaxda

Lahaanshaha awood ee loogu baahan yahay sameynta Warqada Ogalaanshaha Wakiilka macneheedu waxa weeyi inaad fahantey:

- Nooca go'aan shakhsi ee wakiilkaagu kuu sameynayo adiga;
- Masuuliyada aad siineyso wakiilkaaga;
- Inuu qofka aad u magacowdey wakiilkaagu run ahaan uga fikirayo caafimaadkaaga;
- Inaad u baahan karto qofka aad u magacodey wakiilkaaga inuu kuu sameeyo go'aamo adiga;
- In ilaa iyo inta aad maskax ahaan u awoodo aad ka noqon karto (joojin karto) Warqadaada Ogalaanshaha Wakiilka, iyo
- In ay jirto fursad uu wakiilkaagu six un ugu isticmaali karo fasaxaaga.

**Xidhiidhka-isku tiirsanaanshaha lamaanaha**

Kalmad u gaar ah Alberta loona isticmaalo xidhiidhada ka baxsan guurka oo uu xukumo xeerka isku – tiirsanaanta lamaanaha Alberta.

Waa "xidhiidh isku tiirsanaasho" oo ka dhexeeya labo qof oo:

- Wada noolaa saddex sano ama in ka badan; ama
- Wada nool oo ilmo ka wada dhexeeyo, dhalmo ahaan ama korsoomo; ama
- Saxeexay heshiish isku tiirsanaan lamaane.

"Xidhiidh isku Tiirsanaansho" oo labo qof:

- Midba midka kale nolosha la wadaago; iyo
- Dareen ahaan isku diyaar ah; iyo
- U shaqeeysta hal guri iyo dhaqaale.

Hadii aad ka warwarsan tahay in qof carqaladeeyo awoodaada maskaxeed, waxaad qabsan kartaa looyar si uu kuugu diyaariyo Warqada Ogalaanshaha Wakiilka. Waxaad sidoo kale weydiisan kartaa dhakhtarkaaga warqad sheegeysa inaad maskax ahaan u awoodo.

Xataa hadii aad qaado talaabooyinkan, waxa marwalba suurto gal ah in qofku weydiisto garsoore inuu baabiyo Warqadaada Ogalaanshaha Wakiilka, garsooruhuna sidaasi ayuu sameyn karaa hadii ay u tixgaliyaan in ay tahay dantaada.

## Magacaabista Wakiil

**Masuul,** Cida **Ilmaha**, Qof leh masuuliyad sharci si uu u daryeelo dhaqaale ahaana u tageero ilmaha, iyo masuuliyada uu ku sameynayo dhamaan go'aamada la xidhiidha ilmaha. Ilaa maxkamadi amar bixiso, waalidka ilmaha ayaa masuulkooda ah.

**Dardaaran,** Bayaan sharci oo sheegaya sida qof uu rabo in loola tacaalo hantidiisa markuu dhintu ka dib.

Ereyga "**Wakiil**" waxa loola jeedaa qofka ama dadka aad u doorato in ay kugu matalaan adiga arimahaaga shakhsi, ee aan khuseyn dhaqaale. Wakiilkaagu waa inuu jiraa 18 sano da'ahaan maskax ahaan awoodaa.

Qareenkaagu sidoo kale waa inuu:

- Rabaa inuu ku noqdo wakiilkaaga;
- noqdaa daacad la iskuna haleyn karaa;
- si fiican u garanayaa waxaad rabto fahnmaya turjumanayaana tilmaamahaaga.

Waa haboon tahay, laakiin qasab ma ahan, wakiilkaaga inuu ku noolaado isla gobolka aad ku nooshahay.

Waxaad magacaabi kartaa hal ama dhowr wakiil si ay u kuu matalaan isla wakhti (**wakiil caawiyayaal**). Waxaad codsan kartaa in wakiil-caawiyayaashaadu uu si wadajir ah kuu wada matalaan("si isku duuban") ama waxay u shaqeyn karaan si gaar gaar ah iyo si wada-jir ahba ("si shakhsi shakhsi ah iyo si wadajir ahba"). Haddii ay si gooni ah u wada shaqeeyaan si gooni-gooni ah iyo si wado jir ahba, markaa mid ka mid ah wakiiladu waxay awoodi doonaan inuu keligii ku matalo adiga. Haddii mid ka maqan yahay ama jiran yahay, tusaale ahaan, kan kale wuxuu weli awoodi karaa inuu bixiyo tilmaamaha isagoo ku matalaya. Haddii aadan sheegin in ay si gooni-gooni ah u shaqeyn karaan, waxa walba si wada-jir ah ayey u qaban doonaan. Ogow in magacaabida wakiil caawiyaashu ka dhigi karto arintamaha kuw adag hadii go'aamada loo baahdo in degdeg loo sameeyo.

Hadii aad magacowdo wakiil caawiyayaal, waa inaad ku dartaa hab ay ku xalin karaan khilaafyada hadii ay soo baxaan. Hadii aanad ku ku darin, Xeerk Warqada Ogalaanshaha Wakiilka wuxuu sheegayaa in go'aanka badi wakiilada la raaci doono.

Waa inaad sidoo kale magacowdaa ugu yaraan hal **Badel Wakiil** kaasi oo matali kara hadii wakiilkaagu dhinto, noqdo mid maskax ahaan aan awoodin ama aan ku matali Karin. Hadii aad magacowdo dhowr badel, waa inaad cadeysaa sida ay u kala horeyanayaa.

Hadii midkoona wakiilaada, wakiil caawiyayasha ama badelayaasha aad ku magacowdey warqadaada ogalaanshaha wakiilku aaney ku matali Karin, warqadaada ogalaanshaha wakiilku ansax ma noqneyso, waxa waajb ahna inaad sameyso mid cusub.

Hadii midkoodna aanu awoodin ama rabin inuu noqdo wakiilkaaga, waxaad u magacaabi kartaa **Xafiiska Masuuliyada Dadweynaha iyo Amaanada**. Hadaba, Masuuliyada dadweynu waa ogalaadaa inuu noqdo wakiilkaaga ka hor intaanad magacaabin.

## Makhraatiga Warqada Ogalaanshaha Wakiilka

Qofkasta oo da'diisu tahay 18 sano jir am aka weyn oo maskaxiyan u awooda markhaati wuu ka noqon karaa warqada ogalaanshaha wakiilka. Adiga iyo markhaatigaagu waa inaad xaadir u ahaataan si wado jir ah midkiinba mid kalena arkaa isagoo saxeexaya warqada si ay sax u noqoto. Markhaatigu waa inuu daacad noqdaa iskana diidaa inuu markhaati ka noqdo warqada ogalaanshaha wakiil hadii uu haysto sabab uu su'aal ku galiyo awoodada maskaxeed.

Dadka qaar ma gali karaan markhaati:

- Qofkasta oo ka yar da'da 18;
- qofkasta oon maskaxiyan u awoodin;
- qofka loo magacaabey wakiil ahaan (oy ku jiraan wakiil-caawiyayaasha ama badalayaasha);
- Xaaska/sayga ama lamaanaha qofka loo magacaabey wakiilka;
- Xaaska/sayga ama lamaanaha qof sameynaya ogalaanshaha;
- qofka usaxeexay warqada ogalaanshaha isagoo matalaya bixiyaha ogalaansha; iyo
- xaaska/sayga ama lamaanaha qofka saxeexay warqada isagoo matalaya bixiyaha ogalaansha.

## Masuulka Caruurta Yar-Yar

Hadii aad tahay masuul ilmo yar, waxaad u magacaabi kartaa qof inuu kuu daryeelo ilmahaaga hadii aad adigu aanad awoodin maskax ahaan. Qofkani wuxuu  noqon karaa wakiilkaaga ama qof kale.

Xasuuso in Waqrada Ogalaanshaha Wakiilku kaliya shaqeyneyso intaad nooshahay. Inaad u magacowdo masuul caruurtaada lacala hadii aad geeriyooto, waxaad u baahan doontaa inad ku tarto arintan **Dardaarnka**. Si kasta oo ay noqoto, maxkamaddu way beddeli kartaa mas'uulka haddii ay go'aamiso in qofka aad magacawdaa uusan ku habboonayn.

## Awoodaha Wakiilka

Wakiilkaagu wuxuu awoodi doonaa inuu sameeyo go'aankasta oo shakhsiyadeed oo aad awoodo, ilaa aad u cayinto xad awoodiisa.

Wakiilkaagu wuxuu masuulka yahay:

- inuu kula tashado ka hor intaanu sameyn go'aamadaa shakhsiyadeed;
- kuu sameeyo go'aamo shakhsiyadeed oo aan la xhdiidhin dhaqaale  in mudo ah;
- sameynta go'aamo ku sahabsan daaweyntaada caafimaad  (tusaale, nidaamka daaweynta,lafo-daaeynta, ku daaweynta dabiiciga, duugitaanka, talaalka, daaeynta kasarka, sameynta go'aamada geerida);
- sameynta go'aamada la xidhiidha halkaad ku nooshahay iyo cidaad la noolaaneyso;
- sameynta go'aamda la xidhiidha dhaqdhaqaaqyadaada shakhsi (jimsiga, bulshada, shaqaaleysiinta, waxbarashada);
- fahmida tilmaamkast oo cad  oo Warqadaada Ogalaanshaha Wakiilka ah;
- hadii ay jiraan tilmaamo aaan cadeyn, sameynta go'aamada uu aaminsan yahay inaad sameyn lahayd isagoo kusaleynaya aqoontiisa rabitaankaaga, aragtidaada, iyo fikirkaaga.
- hadii aaney jrin wax tilmaam ah oo aan cadeyn oo wakiilkuna aanu garaneyn rabitaankaaga iyo aragtidaada, ka dib sameynta go'aamada uu aaminsanyahay in ay dantaada yihiin;
- Ilaalinta dhamaan go'aamda laguu sameeyey iyo kaydinta kaydka ugu yaraan labo sano ka dib intaaney lumen wakiilashadaada.
- idin siiyo adiga iyo looyarkaaga liiska dhamaan go'aamada ay kuu sameeyeen adiga markast oo la weydiiyo.

Wakiilku ma fasixi karo:

- **cilmi-nafsiyeedka** sida ku qeexan Xeerka Caafimaadka Maskaxda;
- Nadiifinta aan caafimaad ahaan ahayn mid lagama maarmaan u ah ilaalinta caafimaadka ogalaashe sameeyaha;
- Ka-qayb-galka ogalaanshe bixiyaha ee Hawlaha ee cilmi-baarista ama hawlaha tijaabada ah, haddii ka-qayb-galintu ay wax yar ama wax faa'iido ah u lahayn ogalaanshe bixiyaha; iyo
- Ka saarida unug ka jirka ogalaanshe bixiyaha si loogu amaqaalo jirka qof kale oo nool iyadoo la raacayo Xeerka Xubin ku Deeqista iyo Nudmaha Binaaadamka ama ee loogu talo galay waxbarashooyinka caafimaadka ama ujeeddooyinka cilmi baarista (sida: Noqosho Bixiye).

**Xasuuso hadii aad xad u sameyso awoodaha wakiilkaaga, ma awoodi doon inuu sameeyo go'aamo ka baxsan awoodahaasi. Hadii aanu qofna haysan go'aamadan, waa inuu qof ka codsadaa maxkamada inuu noqdo masuulkaaga.**

Haddii aad rabto Wakiilkaaga in lagu siiyo lacag shaqada uu ku shaqeynayo adiga, waa inaad si gaar ah ugu sheegtaa warqadaada ogalaansha wakiilka.

Waxaa laga yaabaa inaad rabto inaad ku darto shuruudo sheegaysa in wakiilkaaga looga baahan yahay in ku u ilaaliyo macluumaadkaaga lacageed qarsoodi. Wakiilkaaga wuxuu ubaahan yahay inuu u sheego macluumaad ku filan si uu u guto waajibaadkiisa iyo inuu adeeco sharciga. Haddii kale, Wakiilkaaga waa inuu ixtiraamo asturnaantaada ilaa aad si gaar ah ugu ogalaato wakiilkaaga Waqrada Ogalaansha Wakiilka dhexdeeda inuu sheego warbixinaha sirta ah ee kale.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku sahabsan **Diwaanka ku deeqista xubnaha ee Alberta**, booqo: https://myhealth.alberta.ca/pages/otdrhome.aspx

Faahfaahin dheeraad ah oo ku sahabsan barnaamijka bixiyaha tooska ah, kookho:

Edmonton: https://www.albertahealthservices.ca/findhealth/service.aspx?Id=5853

Calgary: https://www.albertahealthservices.ca/findhealth/service.aspx?Id=1738

**Xanuunada Maskaxda**, Nidaamkasta oo meesha ka saaraya, burburinaya, ama carqaladeynaya soo socodka nudaha caadiga ah ee maskaxda ama la dhex galinayo cidhifyo loogu talo galay kicinta shaqeynta ilektaroonada iyadoo loogu gol-leeyahay badelista dabeecadaha ama daaweynta xanuunada maskaxda, lakiin ayna ku jirin nidaamyada neerfaha ee lagu baaro ama daweeyo xanuunada daran ee jidhka ama miyir meelka marka xaaladahani si cad loo muujin karo.

## Dhaqan-Galinta

Warqada ogalaanshaagu kaliya waxa shaqeyneysaa (la istcimaali karaa) marka aad weydo awoodaada maskaxeed si aad usameyso go'aamo shakhsi. Waad yeelan kartaa awood maskaxeed oo aad ku sameyso go'aamada qaar lakiin waayi kartaa awood maskaxeed oo aad ku sameyso go'aamada shakhsi ee kale. Tusaale ahaan, waxa suurto gal inaanad awoodin sameynta go'aamo daryeel caafimaad oo muhiim ah lakiin aad wali awoodo inaad sameyso go'aamdaada arimahaaga maalinlaha ah.

Ogalaanshe bixiyuhu wuxuu u dooran karaa labo hab midkood si loo dhaqan galiyo Warqada Ogalaansha Wakiilka:

1. Waxaad ku magacaabi kartaa qof Warqadaada Ogalaanshaha Wakiilka si uu u go'aamiyo awoodaada maskaxeed. Qofkani waa inuu la tashadaa dhakhtar ama qof ku takhasusey cilmi nafsiga ka hor intaanu qorin bayaan ah inaanad lahayn awood.
2. Hadii aanad magacaabin qof ogaamiya awoodaada ama qorkani aanu awoodin inuu qoro ama rabin ama lala xidhiidhi Karin, labo adeeg-bixiyayaal (ugu yaraan mid waa inuu noqdaa dhakhtar ama takhasuse cilmi nafsi) waa in ay qoraan bayaan sheegaya inaad laadahay awooda.

Bayaan qoran oo sheegaya inaanad lahayn awooda waxa loo yaqaan **Bayaanka Awood la'aanta**. Bayaanka awood la'aantu waa in la siiyaa adiga, wakiilkaaga iyo qofkasta oo aad ku magacowdey Warqada Ogalaanshaha Wakiilka inuu helo nuqul. Bayaanka awood la'aantu waa inuu sheegaa in go'aamin laseemeyey inaanad lahayn awood iyo inaand ka codsato maxkamada dib u eegis go'aankan.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku sahabsan masuuliyadaha wakiilka, ka eeg buuga yare e loo yaqaan **Noqoshada Wakiil**
https://www.cplea.ca/wp-content/uploads/BeingAnAgent.pdf

# Dib helida Awooda Maskaxda

Waxa suurto gal ah inaad dib u hesho awooda maskaxda si aad u sameyso qaar ama dhamaan go'aamda shakhsiyadeed marlabaad.

Haddii wakiilkaaga ama bixiyaha adeegu uu u maleynayo in isbeddel weyn ku yimid awooda maskaxdaada, wakiilkaaga iyo bixiyaha adeegga waa inay la tashadaan midba midka kale waxayna qiimeynayaan awooddaada maskaxda. Waa inay isku raacaan inaad dib u heshay awooda maskaxda. Haddii aysan sidaa yeelin, mid ka mid ah labada adeeg bixiyeye ee kale (ugu yaraan hal waa inay noqdaan dhakhtarka ama ku takhasuse cilmu-nafsiga) waa inay qiimeeyaan awooda maskaxeed oo ay go'aan ka gaaraan.

Haddii aad u maleyneyso in aad dib heshay awooda, waxaad ka codsan kartaa in wakiilkaaga ama bixiyaha adeeggaaga uu qiimeeyo awooddaada maskaxda. Laakiin wakiilkaaga ama bixiyaha adeegga ayaa diidi kara codsigaaga haddii aysan u maleyneynin inay jirto isbeddel weyn oo ku yimid maskaxdaada.

Haddii aad dib u hesho awood maskaxeed, markaa waa in la dhammeystiro go'aanka dib helista awooda. Warqada waa in lagu siiyaa adiga, dhakhtarkaaga, Wakiilkaaga, iyo, haddii ay khuseyso, hawl-wadeenka guri aad ku nooshahay.

*Xeerka Warqada Ogalaanshahu* wuxuu ku qayexayaa **isbadel muhiim inuu** yahay "hormumar la arki karo siina soconaya oo aan u muuqan mid ku meel gaadh ah"

**Inta ugu badan, kuguma filna nuqul Warqada Ogalaanshaha Wakiilka. Adeey bixiyaayaashu waxay u baahan doonaan in la mid uun arkaan orjinalka ama nuqulka/koobiga.**

**Nuqul la sharciyeeyey (nootaayo saxeexdey),** Warqad ay u ansaxisay nootaayo nuqul run ah oo original ah.

Alberta, nootaayadu waa qof ay siiyeen awoodo *nootooyinka iyo komishaneerada xeerku* si uu u xaqiijiyo warqadaha.

Faahfaahin dheeraad ah oo ku sahabsan **Diwaanka Warqada Ogalaansha Wakiilka** booqo https://pdr.alberta.ca/web/Default.aspx.

# Halka lagu kaydinayo Warqada Ogalaansha Wakiilka

Marka warqadaada ogalaansha wakiilka la dhameystiro lana saxeexo, waxaad ku sameyn kartaa mid ama in kabadan kuwan soo socda:

1. Waxaad dhgi kartaa wwarqadaada ogalaansha wakiilka ee orajinalka/asalka ah meel amaan ah oo qwakiilkaagu ogyahay uuna uga heli karo si degdeg hadii loo baahdo.
2. Waxaa sameyn kartaa dhowr warqad ogalaansho oo orojinal ah si aad u haysan karto xabad asal/orojinal ah sidoo kalena aad siiso mid orojinal ah wakiilkaaga iyo badelkiisa.
3. Waad u dhibi kartaa orjinalka qof aamin ah, sida looyar, iyadoo leh tilmaamo cayiman oo sheegaya marka la bixinayo.Hadii aad sameyso tan, xasuuso in ay sanado qaadan karto ka hor inta warqadaada ogalaanshaha loobaahan qofka aad kaga tagteyna aanu guurin ama dhiman wakhtigaa.
4. Waxaad ogeysiin kartaa xubnaha qoyskaaga, xisaabiyayaashaada ama la taliyayaasha kale ee aaminka ah inaad haysato warqada ogalaansha wakiilka. Waxaad sidoo kale siin kartaa iyaga nuqun/koobi. Waa inaad taxdaa dadka aad siisey nuqunlka si aad u ogeysiin karto isbadalka mustaqbalka.
5. Waxaad ka diwaan-galin kartaa **Diwaanka Warqadaha Ogalaanshaha Wakiilka** ee Alberta. Diwaankani wuxuu taxayaa kaliya macluumaadka lagalasoo xidhiidhayo adiga iyo wakiilkaadada. Ma haysanyo nuqul Warqadaada Ogalaabshaha Wakiilka ah. Hadii aad iska diwaangaliso diwaanka, khubarada daryeelka caafimaad way arki karaan inaad leedahay Warqada Ogalaanshaha Wakiilka wayna heli karaan halka lagala soo xidhiidhayo wakiiladaada.  Waxaad iska diwaan galin kartaa hab onlaayn ama internetka ah adoo iimayl ku diraaya foomka masulliyada dadweynaha.

# Dib u Eegista Warqada Ogalaanshaha Wakiilka

Dib u eeg Warqaadada Ogalaansha Wakiilka:

- ugu yaraan hal mar sanadkiiba;
- markasta oo ay jiraan ay isbadelo muhiim ahi ku yimaadaan xidhiidhka aad la leedahay dadka kale;
- Hadii xub ka mid qoyskaaga, ama kuwo kale ee kuu dhow ay is furaan, guursadaan ama geeriyoodaan;
- hadii wakiilkaagu dhinto ama yidhaahdo ma awood ama ma rabo inaan ku matalo adiga; ama
- Hadii ay jiraan isbadelo muhiim ah oo ku yimaada caafimaadkaaga.

Ka dib markaad dib u eegto warqaadada ogalaanshaha wakiilka, waxaad go'aansan kartaa in ay u baahan tahay wax ka badal.

# Joojinta Warqada Ogalaanshaha Wakiilka

Alberta, guursashada ama galitaanka xiriirka lamaane ma saameynayo ansaxnimada warqada ogalaanshaha wakiilka. Sidoo kale kala tagis, furniin ama dhimasho ma saameyneyso.

Ilaa inta aad leedahay awood maskaxeed, waad ka noqon kartaa warqadaada ogalaanshaha wakiilka wakhti kasta. Tan waxaa loo samayn karaa siyaabo dhowr ah:

- Warqadaada ogalaanshuhu waxay sheegi kartaa in dib looga noqdey dhacdo garaa awgeed sidaas darteedana warqadaada ogalaansha la joojiyey taariikhda dhacdadaasi.
- Waxaad sameyn kartaa warqad ogalaansho cusub oo burineysa/beenineysa warqadii hore. Warqadaadii ogalaanshehee hore waa la joojinayaa inta la xidhiidha burinta inta kale sax ayey haaneysaa wali.
- Waxaad sameyn kartaa warqad ogalaansho oo cusub taas oo si cad u sheegeysa ka noqoshada dhamaan warqadihii hore.
- Waxaad qori kartaa bayaan cusub oo si cad u sheegaya inaad ka noqoneyso/joojineyso warqada ogalaanshaha wakiilka.

**Macne ma leh sida aad u joojiso Warqadaada Ogalaanshaha Wakiilka, markasta warqadu waa in noqotaa qoraal oo ay uu seexeexaa iyo taariikhna u yeelaa hal qof.**

Markaad joojiso Warqada Ogalaanshaha Wakiilka, waa inaad:

- sida ugu dhakhsaha badan u ogeysiisaa wakiilkaaga ama qofkast oo kale oo aad siisey nuqul/koobi si aad iskaga ilaaliso jaho-wareer; iyo
- baabisaa dhamaan orojinalka iyo nuqulada warqada la joojiyey si aad iskaga ilaaliso jaho-wareer; iyo
- ogeysiisaa diwaankaaga Warqada Ogalaanshaha Wakiilka, hadii aad diwaangalisey Warqadaada Ogalaanshaha Wakiilka, keentaana macluumaad wax laga badaley.

# Ku Sameyn Maamul Xumo Warqada Ogalaanshaha Wakiilka

Sharciga way kasoo horjeedaa in su xun loo isticmaalo warqda ogalaanshaha wakiilka. Hadii aad wali leedahay awood maskaxeed, waad ka joojinkartaa Warqadaada Ogalaansha Wakiilka waxaadna sameyn karta mid cusub.

Hadii qoyskaaga, saaxiibadaa ama adeeg-bixiyayaashu aamisan yihiin in go'aamadaada shakhsi aan si fiican u sameyn wakiilkaagu oo ay suurto gal tahay in jidh ahaan iyo maskax ahaan wax kuu yeelogo'aanada wakiilkaagu, waxay ka gudbin karaan dacwad lasocoto Daryeelka dadweynahu. Daryeelka dadweynuhu wuu baadhi doonaa xalna kiini doonaa. Cdikasta oo daneyneysa (sida qoyska ama saxiibada) way ka codsan karaan maxkamada caawimo.

# Diidida Warqada Ogalaanshaha Wakiilka

**Qofkasta oo daneynaya** wuxuu ka codsan karaa maxkamada in:

- uu su'aal galiyo awooda qofka bixinaya ogalaanshaha ama wakiilka;
- go'aamnta saxnaanta Warqada Ogalaanshaha Wakiilka, ama qeyb ka mid ah;
- uu badelo, xaqiijiyo ama joojiyo dhamaan go'aamada uu sameeyey wakiilku;
- go'aaminta ogalaanshaha wakiilka;
- uu joojiyo ogalaanshaha wakiilka (gabi ahaanba ama qeyb) hadii wakiilku ku guul dareysto inuu u hogaansamo Warqada Ogalaanshaha Wakiilka maxkamadu u tixgaliso in guul daradani ku sababi karto khatar caafimaadka jidhka ama maskaxda ogalaanshe bixiyaha;
- u talo iyo tusaale bixiyo
- u sameeyo go'aan hadii wakiilku aanu ku raaci Karin;
- u dib u dhigo go'aanka wakiilka; ama
- U sameeyo nidaamkasta oo maxkamadu u tixgaliso sax.

*Xeerka Warqada Ogalaanshaha Wakiilku* ma sheegayo "cida daneyneysaa" cida ay tahay. Maxkamada ayaa awood u leh.

# Erey-bixinta

**Adeeg Bixiye**

Qofka ka shaqeeya ganacsi ama xirfad kasoo siiya adeeg shakhsiyadeed  ash-khaas taasi oo uga baahan go'aamo shakhsiyadeed shakhsiga. Tusaalayaal bixiyayaashu adeegyadu waa:- Dhakhtarka ilkaha, duugitaanka jidhka, dhakhtarka dhabarka iyo lafaha, daryeel-bixiyayaasha deegaanka,  xirfadlayaasha kale ee daryeelka caafimaadka, looyarada, ama xisaabiyayaasha.

**Amarka Masuulnimada**

ee qof **weyn**, amar maxkamadi sameysay kuna xusan xeerka 26 ee Masuulinimada qof weyn iyo Aaminaada ee Alberta kana jawaabaya codsiga qofka codsanaya in loo magacaabo masuulka qof weyn.

**Awood maskaxeed**

Awooda lagu fahmo macluumaadka la xidhiidha go'aan gaadhista iyo awooda lagu aqoonsanayo caqabadaha muuqda ee go'aanka.

**Go'aan shakhsiyadeed**

Go'aan la xidhiidha arimiaha shakhsiga oo ay ku jiraan, iyadoon wax xanibaad ahi jrin, rabitaan xor ah, diidmo rabitaan xor ah, ama kala noqoshada rabitaanka daryeel caafimaad.

**Go'aaminta dib-helitaanka awooda**

Warqad qoran oo xaqiijineysa in tilmaam-shakhsi bixiyuhu dib u heley awoodii maskaxeed si uu u sameeyo badh ama dhamaan go'aamada shakhsiyadeed iskii.

**Lamaane isku-tiirsan**

Qof aad la leedahay xidiidh isku-tiirsanaan lamaane.

**Masuul**

qof **weyn** ah, qof loo magacaabey masuul ahaan amarka masuuliyada ee lagu xusey xeerka 26 ee masuulnimada iyo aaminaada ee Alberta. Masuulka qof weyn wuxuu awood u leeyahay inuu u sameeyo go'aamo shakhsiyadeed, aanse ahayn kuwo dhaqaale qofkaasi weyn.

**Maxkamad**

Maxkamada Queen's Bench ee Alberta ama maxkamada gobolka Alberta, iyadoo ku xidhan tahay xaalada.

**Qareen**

A person who is named to act on behalf of the Donor in a Power of Attorney or an Enduring Power of Attorney. Qof loo magacaabey inuu matalo deeq-bixiye

**Sameeye**

Qofka bixiya tilmaamaha-shakhsiyadeed.

**Wakiil**

Qof lagu magacaabey tilmaam shakhsiyadeed si uu u gaadho go'aamo shakhsi isagoo matalaya tilmaam/amar bixiyaha.

**Wakiil kale**

Qof lagu magacabey dikreeto/tilmaam shakhsiyadeed si uu u hawl-galo hadii wakiil kale aanu matali Karin.

**Wakiil-weheliye**

Wakiil awoodo la mid ah kuwa wakiilka leh. Awoodahu waxay ka sareyn karaan go'aamada shakhsiyadeed ama go'aamada shakhsiga ee kala duduwan. Wakiil-weheliyuhu wuxuu lahaan karaa ' awoodo wadajir ah( waa in ay go'aan uga gaadhaan shayada si wada jir ah) ama awoodo "dhowrn ah wado jirna ah" (Labada wakiil midkood ayaa go'aan ka gaadhi kara).

**Wakiilnimada qareenka**

Nooc matalaad qareen oo sii socota xataa hadii qof ku lumiyo awooda maskaxdiisa.

**Warqada Ogalaansha Qareenka**

Warqad (dumenti) qoran, saxeexan, taariikhaysan oo makhraatina leh kaasi oo siinaya qof kale (qareenkaaga) xaquuqda inuu kugu matalo adiga waxyaabaha la xidhiidha arimahaaga dhaqaale inta aad nooshahay. Warqada Ogalaanshaha qareenku waxay noqon kartaa xeer gaar ah, mudo cayiman ah, ama si guud dabiiciyan.

**Xaqiijinta awood-la'aanta**

Warqad qoran taasi oo xaqiijineysa inaanan tilmaa-shakhsi bixiyuhu aanu lahayn awood maskaxeed si uu u sameeyo go'aamo shakhsi iskii.

**Xaas**

Qofka qof uu si sharci ah u guursadey/qabo.

**Xidhiidhka-isku tiirsanaanshaha lamaanaha**

Kalmad u gaar ah Alberta loona isticmaalo xidhiidhada ka baxsan guurka oo uu xukumo xeerka isku – tiirsanaanta lamaanaha Alberta.

Waa "xidhiidh isku tiirsanaasho" oo ka dhexeeya labo qof oo:

- Wada noolaa saddex sano ama in ka badan; ama
- Wada nool oo ilmo ka wada dhexeeyo, dhalmo ahaan ama korsoomo; ama
- Saxeexay heshiish isku tiirsanaan lamaane.

"Xidhiidh isku Tiirsanaansho" oo labo qof:

- Midba midka kale nolosha la wadaago; iyo
- Dareen ahaan isku diyaar ah; iyo
- U shaqeeysta hal guri iyo dhaqaale.

# Macluumaad

## Shuruucda

### Daabacaada Alberta Queen

Nuqulo daacabacaad xeerar iyo shuruuc bilaasha

Website: www.qp.alberta.ca

## Dawlada iyo Adeeyada maxkamadaha

### Maamulka Alberta

www.alberta.ca

### Alberta Courts

www.albertacourts.ca

### Resolution and Court Administration Services (RCAS)

Qanuunada iyo Adeegyada Taageero ee Alberta.

La xidhiidh xarunta: 1.855.738.4747

https://www.alberta.ca/rcas.aspx

### Caawimada Alberta

Hel in ka badan 30 barnaamij iyo 120 adeeg bulsho.

Bilaash ku wac: 1.877.644.9992

### Xafiiska Daryeelka dadweynaha iyo Amaanada

Adeegyada iyo caawimada dadka Alberta ee jilicdasan iyo qoysaskooda.

Bilaash ku wac: 310.0000 then 780.422.1868

www.alberta.ca/office-public-guardian-trustee.aspx

## Adeegyada Sharciga

### Adeega Sharci yaqaanada looyarada Alberta

Waxay bixisaa magacyada saddex looyar. Loorkastaaba wuxu bixiyaa saacad badhkeed oo la tali bilaash ah.

Bilaash ku wac: 1.800.661.1095

https://www.lawsociety.ab.ca/public/lawyer-referral/

### Caawimada Sharciga ee Alberta

Bilaash ku wac: 1.866.845.3425

www.legalaid.ab.ca

### Shaybaadhka Edmonton

Shaybaadhka Edmonton. Saacadaha wicitaanka iyo ku haboonanta.

780.702.1725

www.eclc.ca

### Hagitaanka Sharci ee Calgary Legal

Shaybaadhka Calgary. Saacadaha wicitaanka iyo ku haboonanta.

403.234.9266

http://clg.ab.ca

### Shaybaadhka Bulshada – Central Alberta

Shaybaadhka Alberta. Saacadaha wicitaanka iyo ku haboonanta.

**Central Alberta:** 403.314.9129

**Fort McMurray:** 587.674.2282

**Lloydminster:** 587.789.0727

**Medicine Hat:** 403.712.1021

www.communitylegalclinic.net

### Hagaha Sharci ee Grande Prairie

Shaybaadhka Grande Prairie Saacadaha wicitaanka iyo ku haboonanta.

780.882.0036

www.gplg.ca

### Hagaha Sharci ee Lethbridge

Legal clinic in Lethbridge. Saacadaha wicitaanka iyo ku haboonanta.

403.380.6338

http://www.lethbridgelegalguidance.ca/

### Wac Sharciga

Warbixin la duubey oo diyaar 24 saac maaliwalba 7 maalmood ee wiiga.

Bilaash ku wac: 1.800.332.1091

http://clg.ab.ca/programs-services/dial-a-law/

## Macluumaad

### Ilaalinta Dadka daryeelka ku jira

Soo sheeg xadgudubyada waayeelka ka helaya daryeel ama caawimo adeega dadweynaha ku deeqeen.

Bilaash ku wac: 1.888.357.9339

www.alberta.ca/report-abuse-to-protection-for-persons-in-care.aspx

### Shabakada Aqoonta Dadka waayeelka ah

Macluumaad sharci oo ku sahabsan dadka waayeelka ah.

www.oaknet.ca

### Midowga ururka sare ee Edmonton (SAGE)

780.423.5510

www.MySage.ca

### Xarunta Kerby (Calgary)

403.265.0661

https://www.kerbycentre.com/

### Xarunta macluumaadka ee Golden Circle Senior Resource Centre (Calgary)

403.343.6074

www.goldencircle.ca

# Sameynta Warqada

# Ogalaanshaha Wakiilka

Buugani waa mid ka mid ah daabacado badan oo ay soo saartay Xarunta Waxbarashada Sharciga Dadweynaha ee Alberta. Dhamaan daabacaadaha waxa si bilaash ah loogala degi kara iyadoo la bookhanayo www.cplea.ca/publications or www.cplea.ca/store

Daabacadaha kale ee la xiriira mawduucaan ee laga yaabo inaad daneyneyso wax ka mid ah:

- Dardaarmid
- Sameynta Warqada Ogalaanshaha Wakiilka
- Sameynta Warqada Ogalaanshaha Qareenka
- Noqoshada Wakiil
- Noqoshada Wakiil Shakhsi
- Noqoshada Qareen ku xusan Warqada Ogalaanshaha Qareenka
- Awoodaha Guud Qareenka
- Xeerka Masuulnimada iyo Amaanada
- Ayey/Awow iyo Caruurtaada
- Xadgub Waayeel

Waxa Mahadnaq gaar ah iska leh ururka Sharciga Alberta iyo laanta cadaalada Kanada bixintooda kharashka hawl-galka, oo suurto galiya daabacaadahan oo kale.

Alberta LAW FOUNDATION

Department of Justice Canada

Ministère de la Justice Canada

**We want to know what you think!**

Take our one-minute survey

Capture this QR code with your phone camera or go to https://bit.ly/2TgYzTk

Centre for Public Legal Education Alberta (cplea)

**Phone** 780.451.8764
**Fax** 780.451.2341
**Email** info@cplea.ca
**Web** www.cplea.ca

*Ha iskugu haleyn buugan yar talo sharci ahaan.*
*Wuxuu ku siinayaa macluumaad guud oo ku sahabsan **kaliya sharciga Alberta**. 2020*